



Waalidiinta Raja sare ka leh Waxbarashada Ilmahooda

Filashada iyo Aragtida Waalidku wa wax awood leh

(A Parent's Vision and High Expectations are Powerful - Somali)

Aragtidaada iyo rajada ilmahaaga mustaqbalkoodu wa wax awood leh. Baaris waxa lagu ogaadey, in labadaa saameyn ku yeelan karan guul ka-gaarka dugsiga. Qaas ahaan ka kheyb qaadashada waalidku, waxey ilmahaaga aaminsisaa awoodda tacliintu leedahay.

Marka ilmahaagu bilabaan dugsiga, iyo ill'aa ay ka qalin jebiyay dugsiga sare, rajadaada iyo hamiyadaada waxey ilmahaaga ku dhiira gelisa in ay guul ka garan tacliinta. Waalidiinta hamiyadoodu tahay in ilmahoodu dugsiga sare ka qalin jebiyay, dabadeedna jaamacad ama shaqo aadan, rajadaa ayeey kala xiriiran ilmahooda.

La socodsii rajada iyo hamiyadda aad leedahay.

Wa muhiim in aad ilmahaaga la wadaagto rajada iyo riyada aad ka leedahay horumarkooda tacliinta. Waqti hore, xitaa marka ay dugsiga bilowga yihiin oo si joogta ah. Wada hadalkan waxey ilmahaaga oganayan in waxbarashadu muhiim tahay qoyskaada.

Waxaad ilmahaaga u qabaneyso yool, oo aad doneyso in ay garaan:

- Wax ka weydii ilmahaaga mustaqbalkooda, oo dhegeyso fikradooda
- La wadaag rajada aad ka leedahay tacliinta iney ka garaan markey ka qalin jebiyay dugsiga sare, iyo jaamacadda.
- U sheeg inaad aaminsantahay kartidooda mustaqbalka iyo shaqo

Rajadaada iyo hamiyadaada aya asal u ah horumarka tacliinta iyo dhiira gelin. Ka filo ilmahaaga iney:

- Sida ugu wanaagsan isugu deyaan tacliinta, oo si joogta ah u adaan dugsiga.
- Xilka shaqo ka soo baxaan, sida howsha dugsiga ee guriga lagu qabto, waqtigi laga doonayey howsha ku dhameyan, oo ay isu diyaariyan imtixaanada
- Raajiciyan tacliinta dugsiga sare ka dib

Xiriiri dugsiga iyo noloshu

Inaad ogaato ilmahaaga waxa ay baranayan dugsiga, waxey ka caawineysa inaad kala hadasho mustaqbalkooda. Waxaad ka caawineysa dariiqa isku xiraya halka ay manta jogaan iyo halka ay mustaqbalka garayaan markad:

- Tusto xiriirka ka dhexeeya madooyinka ay baranayan iyo dhacdooyinka aduunka ku heraarsan, waxyaabaha ay xiseyaan ama yoolka ay doonayan in ay garaan.
- Tusto xiriirka ka dhexeeya mowduuca ay baranayan iyo xarakaadka ay jecelyihiin in ay qabtan.
- La wadaagto dugsiga shaqsi ahaan horumarka aad gaartay iyo dhibaataada dugsiga aad u so martay.

Dhis xirfado waxbarasho iyo xeelado

Ilmaha markey gaaran dugsiga dhexe, iyaga masuul iska noqda oo waxey isticmalan xirfado lagu barey guriga. Ka caawi inad xirfadaha oo ay u baahan yihin ku dhiira geliso in ay is timalan si ay waxbarashada horumar ugaaraan. Tani waxad sameyn karta markad:

- Howsha daraasada guriga iyo waxbarashada muhiim ka dhigto
- Ka caawiso ilmahaaga in ay bartaan howlaha tirada badan, oo adag, in ay in-in u qabtaan oo ay maamuli karan.
- Waqtiga akhriska badiso, waqtiga madadaalada telefishanka, telefoonka iyo alaabaha lagu ciyaaro xadido.
- Ka caawi ilmahaaga iney bartan maamulka waqtiga waxbarashada, guriga dibadda u bixidda iyo hawlaha nadaafadda guriga.
- U sheeg ilmahaaga inad ku aamin qabto iney howsha dugsiga qaban karaan, oo amaan markay horumar garaan
- Ka caawi ilmaha habki ay ku heli lahayen cawinaad xagga dugsiga, sida waqtiga dugsiga ka dib waxbarashada macalin ka saacida

Baaris waxa lagu ogaaday, waalidka ilmahooda kala xiriira hamiyadda iyo aragtida ay u leeyihiin, in ay ilmaha ka faaido sareeyan xagga waxbarashada, iyo mustaqbalka.

Su'aalo?

Wax su'aal ah miyad ka qabta lahaanshaha rajada sare? Waxaad soo wici karta Hassan Samantar ee xarunta PACER Center (952) 838-1334 oo waxad codsan karta in uu kala shaqeeyo mashruuca waalidiinta rajada sare ka leh ilmahooda.

Hey'adda PACER wa hey'ad Faa'iido aan u shaqeyn (nonprofit) ee gobolka Minnesota. Waxey saacidaa xuquuqaha waxbarashada caruurta dib u-dhaca leh iyo kuwa aan laheyn. Waxey bixisa tababaro, cawinaad shaqsiyeed, akhbaaro qoraal ah iyo wax sii dheer.